

**OGAYSIISKA QORAALKA AH EE QIIMEYNTA AMA DIB U
QIIMEYNTA
IYO CODSIGA OGOLAANSHAHA**

Ku _____
(Waalidka/Qofka Sharciga ah ee Gaaraya Go'aanka
Waxbarasho)

Taariikhda _____

Ka Mas'uul ah _____
(Magaca Ardayga)

Ciwaanka _____

[LEA] waa la codsaday, ama waxay soo jeedinaysaa, in la dhammaystiro tallaabada soo socota si loo tixgeliyo baahida ilmahaaga ee adeegyada waxbarashada gaarka ah. Fadlan dib u eeg walxaha la calaamadeeyay Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan xor u noqo inaad kala hadasho shaqaalaha waxbarashada [LEA].

A. GO'AANKA WAXBARASHADA GAAR AH EE LA SOO JEEDIYEEY:

☐ **1. [LEA] waxa ay soo jeedinaysaa in la sameeyo qiimayn hore. (Oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay)**

Iyadoo ku saleysan dib u eegista xogta jirta (haddii ay habboon tahay), kooxda IEP (oo uu ku jiro waalidka), ayaa soo jeedinaya in lagu sameeyo qiimaynta hore ee ilmahaaga. Macluumaadka waxaa lagu soo ururin doonaa meelaha lagu calaamadiyay bogga soo socda ee bixiya macluumaadka la xiriira ee si toos ah kooxda uga caawiya go'aaminta:

- haddii ilmahaagu yahay ilmo leh xaalad gaar ah iyo baahida waxbarasho ee ilmahaaga;
- heerarka hadda ee guusha waxbarasho iyo baahiyaha korriinka ee la xiriira ilmahaaga; iyo
- Haddii ilmahaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

☐ **Macluumaad dheeri ah looma baahna.** Iyada oo ku saleysan dib u eegista macluumaadka hadda la hayo, waxaa la go'aamiyay in aan loo baahnayn xog dheeraad ah si loo sameeyo qiimeynta bilowga ah sida kor lagu sharaxay. Macluumaadka jira ayaa la isticmaali doonaa oo bixin doona macluumaadka la xiriira si toos ahna uga caawin doona kooxda go'aaminta baahiyaha waxbarasho ee ilmahaaga meelaha hoos lagu calaamadiyay. Si kastaba ha ahaatee, waxaad xaq u leedahay inaad codsato in qiimaynta la dhammaystiro. Haddii aad rabto in qiimayn noocaas ah la sameeyo, fadlan la xiriir wakiilka dugsiga ee hoos ku xusan 10 maalmood gudahood.

☐ **2. [LEA] waxa ay soo jeedinaysaa in dib u qiimayn lagu sameeyo. (Oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay)**

Iyada oo ku saleysan dib u eegista xogta jirta (haddii ay habboon tahay), kooxda IEP (oo uu ku jiro waalidka), ayaa soo jeedinaya in dib loo qiimeeyo ilmahaaga. Macluumaadka waxaa lagu soo ururin doonaa meelaha lagu calaamadiyay bogga soo socda ee bixiya macluumaadka la xiriira ee si toos ah kooxda uga caawiya go'aaminta:

- Haddii ilmahaagu sii ahaanayo ilmo leh wax ka duwanaansho iyo baahida waxbarasho ee ilmahaaga;
- heerarka hadda ee guusha waxbarasho iyo baahiyaha korriinka ee la xiriira ilmahaaga;
- Haddii ilmahaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira; iyo
- haddii wax lagu daro ama wax ka bedel lagu sameeyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loo baahan yahay si ilmahaagu awood ugu yeesho inuu la kulmo yoolalka sannadlaha ah ee la cabbiri karo ee lagu dejiyay IEP ee ilmahaaga iyo inuu ka qaybqaato, sida ku habboon, manhajka waxbarashada guud.

☐ **Macluumaad dheeri ah looma baahna.** Iyada oo ku saleysan dib u eegista macluumaadka hadda la hayo, waxaa la go'aamiyay in aan loo baahnayn xog dheeraad ah si loo sameeyo qiimeynta bilowga ah sida kor lagu sharaxay. Macluumaadka jira ayaa la isticmaali doonaa oo bixin doona macluumaadka la xiriira si toos ahna uga caawin doona kooxda go'aaminta baahiyaha waxbarasho ee ilmahaaga meelaha hoos lagu calaamadiyay. Si kastaba ha ahaatee, waxaad xaq u leedahay inaad codsato in qiimaynta la dhammaystiro. Haddii aad rabto in qiimayn noocaas ah la sameeyo, fadlan la xiriir wakiilka dugsiga ee hoos ku xusan 10 maalmood gudahood.

☐ **3. [LEA] way diiday inay samayso qiimaynta hore. (Oggolaanshaha waalidka Looma baahna)**

☐ **4. [LEA] way diiday inay samayso dib u qiimayn (Oggolaanshaha waalidka Looma baahna)**

_____ laga heli karo _____
(Qofka la Xiriiri karo Dugsiga) (Taleefoon)

Xogta cusub	Xogtii Hore	
☐	☐	Caafimaadka/Awoodda Kontoroolka- Waxaa ka mid ah qiimaynta xirfadaha dhaq-dhaqaaqa guud iyo kontoroolka wanaagsan, iyo/ama caddaynta cudur ama dhaawac. Qiimaynta waxa kale oo ku jiri kara dhinac wax ka fiirin, jihataynta, dheelitirnaanta, xirfadaha fahanka socodka, xirfadaha taabashada, ama dhibaatooyinka la xiriira ismiisaanka.
☐	☐	Aragtida - Waxaa ka mid ah qiimaynta aragtida dhow iyo tan fog eearaga, kontoroolka muruqa isha, garashada qotada dheer, garasho la'aanta midabada iyo jihataynta/ xirfadaha dhaqdhaqaaqa.
☐	☐	Maqalka - Waxaa ka mid ah qiimaynta saxda ah ee dhawaaqa saafiga ah iyo hadalka, shaqada qaybta dhexe eedhegta, xirfadaha habaynta maqalka dhexe iyo baahida/isticmaalka loo qabo kordhinta sawaxanka codka.
☐	☐	Xaaladda Bulsho/Dareen/Xaalada Dhaqaneed - Waxaa ka mid ah qiimaynta korriinka bulsheed/dareenka/dhaqanka ee la xiriira waxbarashada ilmaha, xiriirada dadka dhexdooda, dareenka iyo/ama calaamadaha jireed. Waxaa ku jiri kara qiimaynta hab-dhaqanka ama qiimaynta si loo go'aamiyo taageerada hab-dhaqanka wanaagsan ee ku habboon.
☐	☐	Garashada Guud – Waxaa ka mid ah qiimaynta awoodaha garashada guud oo ay ku jirto heerka waxbarashada ilmaha, xirfadaha xalinta mashaakilaadka, heerka fahamka fikradeed, isticmaalka xeeladaha garashada iyo/ama kartida caqliga iyo/ama guud.
☐	☐	Natiijada Waxbarashada – Waxaa ka mid ah qiimaynta xirfadaha tacliinta ama waxbarashada ka hor iyo heerarka kasbashada ee la xiriirta manhajka guud sida oraah ama hadal qoraal ah, xirfadaha akhriska ama fahamka, xisaabinta xisaabta ama sababaynta. Ilmaha indhoolaha ah ama aragga naafada ka ah, baahida farta indhoolaha waa la qiimayn karaa.
☐	☐	Xaaladda Wada Xiriirka– Waxaa ku jiri kara qiimaynta awoodda cunugu u leeyahay gudbinta iyo fahamka macluumaadka iyo ujeeddooyinka bulsheed, oo ay ku jiraan xirfadaha ay ka midka yihiin hadalka iyo ku hadalka luuqad,, codkarnimada, faseexnimada, ama kororka xiriirkooda. Ilmaha dhegaha la' ama maqalka adag, tixgelinta luuqadda iyo wada xiriirka cunuga ayaa laga yaabaa in la qiimeeyo.
☐	☐	Xirfadaha Kala-guurka – Waxaa ka mid ah qiimaynta ku haboon ee kala guurka ee la xiriirta tababarka, waxbarashada, shaqada, koorsooyinka waxbarasho, iyo halka ay ku haboon tahay, xirfado nololeed oo madaxbanaan.
☐	☐	Wax kale Qeex:

B. SHARAXAAD KU SAABSAN SABABTA LOO SOO JEEDINAYO GO'AANKAN AMA LOO DIIDAYO:

C. IKHTIYAARADA KALE EE LA TIX-GELIYAY IYO SABABTA IKHTIYAARADAAS LOO DIIDAY:

D. SHARAXAADA XOGTA LOO ISTICMAALAY SIDA SALDHIGA AHAAN OO LAGU SALEEYAY TALLAABADA LA SOO JEEDIYAY AMA LA DIIDAY:

(Oo ay ku jirTO nidaam kasta oo qiimeyn ah, qiimeyn, diiwaan ama warbixin loo adeegsaday oo sal u ah tallaabada la soo jeediyay ama la diiday)

E. ARRIMAHA KALE EE LOO ARKAY INAY MUHIIM U YIHIIN TALLAABADA LA SOO JEEDIYAY AMA LA DIIDAY:

ILAALINTA NIDAAMKA EE LAGU ILAALIYO XUQUUQDA WAALIDKA

Labada sharci ee gobolka iyo kuwa dawlada dhexe ee khuseeya waxbarashada ubadka leh xaalad gaar ah waxaa ku jira xuquuqo badan oo waalidnimo. Helitaanka ogaysiisyada tallaabada uu dugsigu rabo inuu ka qaado ilmahaaga iyo ka mid noqoshada kooxda qorshaynta waxbarashada ilmahaaga ayaa ah tusaalayaalka xuquuqahaas. Sharciyadani waxay sidoo kale u baahan yihiin in dugsigu raaco nidaamyada qaarkood si loo hubiyo inaad ogaato xuquuqdaada oo aad hesho fursad aad ku isticmaasho xuquuqahaas. Dugsiga waxaa looga baahan yahay inuu ku siiyo koobiga xuquuqda waalidka ugu yaraan hal mar sanad dugsiiyeed walbo. Waxaad heshay nuqul ka mid ah xuquuqdaada markii u gudbinta hore ee qiimaynta la sameeyay. Waa inaad si taxadar leh u akhridaa, haddii aad wax su'aalo ah ka qabto xuquuqdaada ama haddii aad rabto inaad hesho nuqul dheeraad ah oo xuquuqdaada ah, waxaad la xiriiri kartaa agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ama iskaashatada waxbarashada gaarka ah.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah ilahan soo socda si ay kaaga caawiyaan inaad fahamto sharciyada dawlada dhexe iyo gobolka ee waxbaridda ubadka leh xaaladaha gaarka ah iyo xuquuqaha waalidnimo (ilaalinta nidaamka) oo ay bixiyaan sharciyadaas: Waaxda Waxbarashada ee Gobolka Kansas 800-203-9462; Xarunta Xuquuqda Baahiyaha Gaarka ee Kansas (DRC) (877) 776-1541; Ururka Qoysaska. 800-264-6343; iyo Keys for Networking 785-233-8732.

GAARSIIN

Aniga, _____,

- ☐ gacanta laga saaray,
☐ santuuqa boostada loogu diray,
☐ si kale _____
(cadee)

ogeysiiskan ku socda _____ Taariikhda _____
(Magaca) (Taariikhda)

CODSIGA OGGOLAANSHAHHA TALAABADA WAXBARASHADA GAARKA AH

(Hadii loo baahan yahay)

Waxaan kaa codsaneynaa inaad na siiso ogolaanshaha si aan u fulino tallaabada waxbarashada gaarka ah sida ku cad ogeysiiska ku lifaaqan. Wixii khilaaf ah ee naga dhexeeya ee ku saabsan mid ka mid ah arrimaha kor ku xusan waxaa lagu xallin karaa is-afgarad labada dhinac ah, iyada oo loo marayo dhex-dhexaadiyayaal ama habraac cadaalad ah. Sharaxaada dhex-dhexaadinta iyo nidaamka cadaalada ayaa la bixiyaa markii la codsado. Talaabada la soo jeediyay ayaa laga yaabaa inay bilaabato isla markii lagaa helo ogolaanshahaaga qoran. Haddi ay tani tahay qiimaynta ugu horeysa ogolaanshahaagu waxa uu bilaabayaa 60 maalin dugsiiyeed ah, hadii ilmahaagu u qalmo, waxaan soo gebagebayn doona ogolaanshahaaga si loo fuliyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira sida waafaqsan IEP. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto ogeysiiskan, waxaad la xiriiri kartaa wakiilka dugsiga oo hoos ku xusan:

_____ Lagala Xiriiri karo _____
(Qofka la Xiriiri karo Dugsiga) (Taleefoonka)

Haddii aad rabto inaad ogolaato og'aanka waxbarashada gaarka ah ee lagu sheegay ogaysiiskan, ama haddii aanad bixin ogolaanshaha, fadlan saxiix oo taariikhda ku qor foomkan (hoos) kuna soo celi wakiilka dugsiga ee kor lagu xusay.

BIXI OGGOLAANSHO

- ☐ ***Waxaan bixiyay ogolaanshaha*** qiimaynta ama dib u qiimaynta lagu sheegay ogaysiiskane ku saabsan ilmahayga.

Waxaan fahamsanahay in oggolaanshahani uu yahay mid ikhtiyaari ah oo laga yaabo in la buriyo wakhti kasta, laakiin burintaasi ma diidayso og'aan dhaca ka dib oggolaanshaha la bixiyo iyo ka hor inta aan oggolaanshaha la burin.

HA BIXIN OGGOLAANSHO

- ☐ ***Ma bixinayo ogolaanshaha*** qiimaynta ama dib u qiimaynta lagu sheegay ogaysiiskane ku saabsan ilmahayga.

(Waalidka/Qofka Sharciga ah ee Gaaraya Go'aanka Waxbarasho) Taariikhda _____

(Waalidka/Qofka Sharciga ah ee Gaaraya Go'aanka Waxbarasho) Taariikhda _____